

## Suurat Al-Qaaricah

## سُورَةُ الْقَارِعَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Qaaricada (qalbiga garaacda).

أَلْقَارِعَةُ ﴿١﴾

2. Qaarica maxay tahay.

مَا الْقَارِعَةُ ﴿٢﴾

3. Mase taqaannaa Qaarico.

وَمَا آدْرَاكَ مَا الْقَارِعَةُ ﴿٣﴾

4. Waa Maalinta Dadku noqon sida Baalallay.

يَوْمَ يَكُونُ النَّاسُ كَالْفَرَاشِ

الْمَبْتُوثِ ﴿٤﴾

5. Buuruhuna ay noqon sida Suuf kala firdhay.

وَتَكُونُ الْجِبَالُ كَالْعِهْنِ

الْمَنْفُوشِ ﴿٥﴾

6. Ruuxiise miisaankiisa (fiican) cuslaado.

فَأَمَّا مَنْ ثَقُلَتْ مَوَازِينُهُ ﴿٦﴾

7. Wuxuu ku noolaan nolol raalli ah.

فَهُوَ فِي عِيشَةٍ رَاضِيَةٍ ﴿٧﴾

8. Ruuxiise uu fududaado Mii-saankiisa (fiican).

وَأَمَّا مَنْ خَفَّتْ مَوَازِينُهُ ﴿٨﴾

9. Wuxuu u hoydaa (Naarta) Haawiya.

فَأَمَّهُ هَوَايَةٌ ﴿٩﴾

10. Ma taqaannaa Haawiya.

وَمَا آدْرَاكَ مَا هَيَّةٌ ﴿١٠﴾

11. Waa Naar kulayl daran.

نَارُ حَامِيَةٍ ﴿١١﴾

Maalinta Qiyaame Magacya badan bay leedahay, waxayna ku tusin waynideeda siduu yidhi Sayid Cali Binu Abii Daalib: Magacyada badan waxay ku tusin waynida ka leh. waana Maalin Miisaan Caddaalad la taagi, Ruux walbana uu la kulmi wuxuu hormarsaday, oo ah abaal-marin Janno wanaagsan, ama Naar kulayl badan.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Naartiibaa u dacwootay Eebeheed iyadoo leh: Eebow qaarkaybaa qaar cunay, markaasuu u idmay Laba neefsasho, mid qabowga ah iyo mid kulaylka ah, waana Qabowga u daran eed heshaan xagaagii, iyo kulaylka u daran eed heshaan Jiilaalkii». waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Al-Qaaricah (1-11).